Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Xiriiriyaha Gargaarka Bani'aadamnimada ee Soomaaliya, Mark Bowden, ayaa toddobaadkan sheegey in dhibaatooyinka Soomaaliya ay ka sii darayaan iyada oo in ka badan 3.6 milyan oo qof – oo ah ku dhowaad kalabar dadka dalka – ay u baahan yihiin gargaar bani'aadamnimo ama mid nolol-raadsi. Isaga oo ka hadlayey shir-jaraa'id uu ku qabtey New York 23kii Sebtembar, ayaa Mudane Bowden uu gargaar ka codsadey deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah maaddaama baahidii maaliyadeed ee biyaha, fayadhowrka, caafimaadka iyo nafaqeynta aan si buuxda loo helin. Waxa uu yiri, "Sawir cad oo ku saabsan ballanqaadyada gargaarka la helayo ilaa dhammaadka sanadka ayaa loo baahan yahay." Ilaa dhammaadkii Sebtembar, Geeddi-socodka Codsiyada isku jira ee Somalia CAP 2009 ayaa 53 boqolkiiba la maalgeliyey, isaga oo heley US$ 448.5 milyan oo ka mid ah $854 milyan ee loo baahnaa. Haseyeeshee, ilaa $215 oo ka mid ah $448.5ka milyan ayaa ahaaa lacagtii sanadkii 2008da oo sanadkan loo soo wareejiyey.

Ururka *Save the Children Somalia* ayaa sheegtey in saamiga carruurta nafaqo-xumada ay hayso uu kor ugu kacay ilaa 20 boqolkiiba oo taasna ay sababtey abaarta ba'an, dalaggii oo aan soo go'in, qiimaha cuntada ee kacay iyo sicir bararka ba'an ee jira. War-saxaafadeed ay soo saartey 19kii Sebtembar, ayaa *Save the Children* ay ku sheegtey in carruurta barokacay ay ku nool yihiin xaalado aad u ba'an iyaga oo aan haysan cunto, biyo nadiif ah ama daryeel caafimaad oo ku filan. In kasta oo ay jireen dhibaatooyin waaweyn ee dhinaca gaaridda iyo ammaanka ah, ayaa haddana ururku uu gaarey carruurta iyo qoysaskooda ee ay baahida ba'ani ku haysay Soomaaliya, isaga oo ka daweeyey nafaqo-xumo iyo isaga oo carruurta ku soo celiyey dugsiyada. "Waxa aan kor u qaadaynaa hawlaheenna aan wax kaga qabaneyno gaajada iyo nafaqo-xumada ka jirta gobolka Hiiraan waxaana aan qorsheyneynaa in aan xarumo quudin iyo barnaamijyo nolol-raadsi ka hirgellinno Somaliland iyo Puntland," ayaa uu yiri ururka *Save the Children.*

20kii Sebtembar, dagaallo u dhexeeya kacdoonsanayaasha iyo ciidamada Dowladda Federalka ee Ku-meelgaarka ah (TFG)/Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) ayaa Muqdisho ku diley 20 qof iyada oo dadku ay u dabaal-degayaan Ciiddii Soonfureed, ee dhammaadka bisha barakeysan ee Ramadaan. Iskudhacyo kale ayaa la soo sheegey 22kii Sebtembar kuwaas oo ay ku dhinteen 12 rayid ah ayna ku dhaawacmeen in ka badan 17 kale. Ugu yaraan 5,000 oo qof ayaa toddobaadka gudihiisa uga barokacay Muqdisho sababo la xiriira ammaan darrida, iyada oo wadarta guud ee dadka barokacay ilaa 1dii Luulyo ay tahay 87,000 oo qof. Ilaa 58,000 oo qof ayaa ka tegey magaalada oo aadey goobo kale oo isla dalka gudihiisa ah iyada oo 28,100 ay ku barokaceen isla Muqdisho dhexdeeda.

Magaalada Xuduudda ku taalla ee Yeed, ee ka tirsan Degmada Rabdhuurre ee gobolka Bakool, ayaa ugu yaraan 10 qof ay ku dhinteen 20kii Sebtembar markii ay dagaallo halkaasi ku dhex mareen maleeshiyaadka Al Shabaab iyo miliishiyaad taageersan dowladda. Al Shabaab ayaa la sheegey in ay qabsatey magaalada.

WFP ayaa gargaarkii cuntada dib ugu bilaabi doonta Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Boosaaso, Puntland ku nool bisha Sebtembar ka dib markii ay wadatashi lagu guuleystey ay la qaateen maamullada. Bishii Agoosto, ayaa Dadka Gudaha Ku Barokacay aaney helin raashinkoodii taasna waxaa sababey is-afgaran-darro u dhexeysey maamullada iyo WFP.

Waxqabadka

Iyaga oo shaqeynayey hal toddobaad oo keliya, ayaa siddeed xarumood oo quudinta dheeriga ah oo WFP ku taageerto Muqdisho ay qabteen 700 oo bukaan ayna daweeyeen ugu yaraan 3,250 carruur shan sano jir ka yar iyo haween uur leh iyo kuwo nuujinayo ah. Arrintan ayaa muujineysa sida ba'an ee Muqdisho loogaga baahan yahay waxqabadyo nafaqeyn. Carruurta ayaa lagu daweyn doonaa *Plumpy'doz* – oo ah cunto u diyaarsan in la cuno oo hodon ku ah fitamiinno badan (*multivitamins*). WFP ayaa taageereysa 190 xarumaha quudinta dheeriga ah oo beegsanaya ilaa 70,000 oo carruur nafaqo-xumo ay ku hayso Soomaaliya oo dhan ah.

Puntland, ayaa WFP iyo la-hawlgalayaasheeda ay 88 metrik ton oo badeecooyin cunto ah ay u qaybiyeen 7,700 oo ka-faa'iideystayaal ah taas oo hoos imaneysey barnaamijyada cunto-tababar-ku-beddelashada ee degmooyinka Qardho, Eyl iyo Boocame ee gobollada Bari, Nugaal iyo Sool. Somaliland iyana, 44,000 oo qof oo kale ayaa ka faa'iideystey

450 metrik ton oo cunto hoos imaneysey barnaamijyada quudinta hay'adaha, cunto-qaybinta guud, caafimaadka hooyada iyo dhallaanka iyo quudinta dheeriga ah ee gobollada Saaxil, Galbeed iyo Togdheer.

Toddobaadkan, ururka *Danish Refugee Council* ayaa soo gebogebeeyey 13 musqulood oo laga dhisayey laba degsiimo oo Dadka Gudaha Ku Barokacay ay deggan yihiin oo ku yaalla Boosaaso, kuwaas oo ay ka faa'iideysanayaan ugu yaraan 390 qof. Isla waqtigaa, waxaa bilowdey dhismaha 28 musqulood oo kale oo laga dhisayo saddex degsiimo oo kale oo ay deggan yihiin Dadka Gudaha ku Barokacay. Saddon haween ah ayaa sidoo kale lagu tababarey wacyiga nadaafadda.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org.
Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org